



Dhambaalka

HALBEEG



WEBSITE

nche.gov.so

EMAIL

info@nche.gov.so

WEEDHA GUDDOOMIYAHA

Ku soo dhowaada cadadkii labaad ee wargeyska Halbeeg oo ku soo beegmay sannadka cusub ee January 2026 oo aan ku rajo weynahay in uu noqdo sannad nabad iyo horumar u horseeda ummadda Soomaaliyeed gaar ahaan bahda Tacliinta Sare oo hawlo qaran oo muhiim ah u haya dalka. Wargeyska oo ah rubucle (quarterly) waxa uu soo gudbiyaa hawlaha Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare (NCHE).

Waxaa cadadkaan diiradda lagu saarayaa waxqabadka guddiga ee afartii bilood ee na soo dhaafay oo sal u ah tayaynta tacliinta sare gaar ahaan diyaarinta xeer-nidaamiyaha, halbeegyada iyo habraacyada lagu kala saaro hay'adaha tacliin sare; iyo diyaarinta siyaasadda iyo istraatiijiyadda qaran ee tacliinta sare.

Guddiga oo la magacaabay bishii July 2025 waxa uu durba billabay in uu daraasaad ku sameeyo xaaladda guud iyo tayada tacliinta sare ee dalka iyagoo baaritaanno iyo wadatashi gaar gaar ah la sameeyn doono hoggaanka hay'adaha tacliinta sare ee dalka iyo madaxda Tacliinta Sare ee Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare. Waxaa kaloo hoggaanka Guddigu xiriiro kala duwan la sameeyeen hay'adaha caalamiga ah ee maalgeliya tacliinta sare sida East African Community, EU, World Bank, Turkey, iyo Malaysia.

Waxa aan ku rajo weynahay in aad maqalkaan ka heli doontaan macluumaad ifiyo hawlaha guddiga iyo barnaamijyada lagu kobcinaayo guud ahaan tayada tacliinta sare ee dalka.

Dr Abdinur Sheikh

GUDDOOMIYAHA GUDDIGA



SOOMAALIYA OO KU BIIRTAY

Isku-xirka Jaamacadaha Bulshada Bariga Afrika (IUCEA)

Soomaaliya oo ku biirtay Guddi-hoosaadyada Golaha Isku-xirka Jaamacadaha Bulshada Bariga Afrika.

Golaha Isku-xirka Jaamacadaha Bulshada Bariga Afrika wuxuu ka kooban yahay 6 guddi-hoosaad, kuwaasoo loo asteeyey shaqooyin kala duwan. Soomaaliya ayaan in muddo ahba laga sugayay inay soo gudbiyaan xubnaha uga mid noqonaya Guddi-hoosaadyada 6-da ah, iyadoo midkiiba ay ku biirayaan laba xubnood. Bisha November 26-keeda 2025 ayaa si rasmi ah Dawladda Soomaalidu u gudbisay xubnaha ku matalaya Guddi-hoosaadyada; kuwaasoo ka kala socda jaamacadaha iyo Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare.



Guddoomiye kuxigeenka Guddiga Qaran ayaa loo doortay inuu xubin ka noqdo Guddi-hoosaadka Hantidhowrka (Audit Committee), kaasoo korjoogteeya arrimaha dhaqaalaha iyo deeqaha waxbarashada Golaha.

Guddigu wuxuu yeeshay shirkii 31-aad, ahaana shirkii koowaad oo Soomaaliya ka qaybgasho 1-dii bisha December 2025, waxaana Soomaaliya uga qaybgalay Dr. Maxamed Cali Faarax iyo Dr. Maxamed Maxamuud Xasan, shirka oo ku dhacay foggaan-arag ahaan, wuxuu bilowday 10:00 subaxnimo, waxaana lagu lafa-guray:

- Doorashada Guddoomiye cusub oo uu guddigu yeesho, waxaana loo doortay: Mr. Parity Twinomujunu oo u dhashay Uganda, isagoo guddiga Hantidhowrka hoggaamin doona muddo laba sano ah; waxaana loo mahadceliyey Guddoomiyihii hore ee Guddiga Mr. Godfrey Byekwaso oo guddiga muddo soo hoggaaminayay.
- Shirka waxaa lagusoo bandhigay warbixinnada dhaqaalaha, iyadoo guddiga la horkeenay lacagaha lagu leeyahay dawlad kasta oo ka mid ah Bulshada Bariga Afrika, waxaana laysla gartay in xoghayntu xiriir la samayso dawladaha. Shirku wuxuu kaloo ka doodday deeqaha waxbarashada iyo sida dawladda Bariga Afrika uga faa'idaystaan, waxaana laysla tilmaamay muhiimadda ay leedahay in si hufan oo caddaalad ah loogu qaybiyo dawladaha xubnaha ah.
- Ugu dambayntii, Guddigu wuxuu soo jeediyey in talooyinka Guddiga xoghayntu Goluhu u gudbiso maamulka si loo dhaqangeliyo.

ESSP

Qorshaha Istaraatiijiyadda Qaran ee Waxbarashada ee 2022 - 2026

Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare ayaa ka qayb galay shirka looga arrinsanayay in la qiimeeyo qorshaha istaraatiijiyadda Qaran ee waxbarashada ee 2022 - 2026.

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare (MoECHE) ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay kulan wadatashi oo ay ka qaybgaleen daneeyayaasha 23–24 Sebteembar 2025, kaas oo diiradda lagu saaray dib-u-eegista iyo dib-u-habaynta Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee Waxbarashada Qaranka (ESSP) 2022–2026. Kulankani waxaa Guddiga ku matalayay Dr. Abdiwahab Ali Mumin iyo Prof. Dr. Abdullahi Sharif, waxa uuna ku dhisnaa natiijooyinkii ka soo baxay Dib-u-Eegistii Wadajirka ahayd ee 2023 iyo Dib-u-Eegistii Bartamaha ee 2024, isaga oo ujeedkiisu ahaa in ESSP lagu waafajiyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) 2025–2029. Ka-qaybgalayaashu waxay qiimeeyeen horumarka la gaaray, caqabadaha jira, hagaajinta bartilmaameedyada, xoojinta kormeerka iyo qiimeynta, iyo kor u qaadidda iskaashi iyo maalgelin, si loo hubiyo in waaxda waxbarashadu noqoto mid waarta, loo wada dhan yahay, kana jawaabta mustaqbalka.

Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha Iyo Tacliinta Sare



MAHEF2025

Soomaaliya oo Xiriir Cusub ee dhanka Tacliin Sare ah la yeelatay Malaysia

Wafdi ka socda Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa si heersare ah uga qaybgalay Shirka Tacliinta Sare ee Malaysia iyo Afrika 2025 (MAHEF2025), oo lagu qabtay Hotel JW Marriott ee magaalada Nairobi.

Hal-kudhegga Shirka waxa uu ahaa:

“Xoojinta Iskaashiga Caalamiga ah ee Dalalka Koonfurta Adduunka.”



MAHEF2025

Shirka waxa martigelisey Hay'adda Adeegyada Tacliinta Malaysia oo ka tirsan Wasaaradda Tacliinta Sare ee dalka Malaysia, waxaana ka soo qaybgalay madax sare oo ka kala socday dowladaha Afrika iyo Malaysia.

Wafdiga Soomaaliya

Dalka Soomaaliya waxa shirka ku metelay:

- Marwo Nuura Mustafa, Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Waxbarashada, Hidaha iyo Tacliinta Sare
- Dr. Abdinur Sheikh Maxamed, Guddoomiyaha Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare (NCHE)
- Dr. Axmed Ibraahim Nageeye, Xoghayaha Guud ee Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare

Intii lagu guda jiray shirka, wafdiga Soomaaliya waxa ay kulan gaar ah la yeeshen madaxda ugu sarreysa tacliinta sare ee Malaysia, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen:

- Madaxa Hay'adda Adeegyada Tacliinta Malaysia
- Agaasimaha Guud ee Waaxda Tacliinta Sare ee Malaysia
- Madaxa Hay'adda Tayaynta Shahaadooyinka Malaysia
- Agaasimaha Akadeemiyadda Hogaaminta Tacliinta Sare



MAHEF2025

Arrimihii ugu muhiimsanaa ee la isla soo qaaday:

- In la diyaariyo Heshiis Iskaashi oo Dhinaca Tacliinta Sare ah oo u dhexeeya labada dal.
- In la xalliyo dhibaatooyinka ay ardayda Soomaaliyeed kala kulmaan Malaysia, sida aqoonsiga shahaadooyinka, oggolaanshaha jaamacadaha, iyo habraacyada diiwaangelinta.
- In labada dhinac iska kaashadaan dhanka:
 - Tayeynta jaamacadaha iyo hubinta tayada (Quality Assurance)
 - Aqoonsiga shahaadooyinka iyo nidaamka heerarka tacliinta (Qualifications Framework)
 - Horumarinta maamulka iyo hoggaanka jaamacadaha
 - Cilmi-baaris wadajir ah iyo aqoon-is-weydaarsi

Mas'uuliyiinta Malaysia waxa ay muujiyeen diyaar garow buuxa iyo rabitaan inay si dhow ula shaqeeyaan Soomaaliya.



MAHEF2025

Heshiis Taariikhi Ah: NCHE iyo Hay'adda Tayaynta Shahaadooyinka Malaysia



Guddoomiyaha Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare, Dr. Abdinur Sheikh, waxa uu ka mid ahaa ka qaybgalayaasha kalfadhiga madaxa bannaan ee looga hadlayay: “Horumarinta, Daryeelidda iyo Kobcinta Iskaashiga Tacliinta Sare.”

Waxa uu soo bandhigay aragtiyo qoto dheer oo ku saabsan:

- Sida Soomaaliya u dhisi karto nidaam tacliin sare oo tayo leh
- Fursadaha iskaashi ee Malaysia iyo Soomaaliya
- Doorka NCHE ee hagaajinta tayada jaamacadaha dalka

Fikirkiisa ayaa si weyn loogu bogaadiyay, wuxuuna sare u qaaday dawrka Soomaaliya ee shirka.

Waxaa dhacay kulan gaar ah oo u dhexeeyay:

- Madaxa Hay'adda Tayaynta Shahaadooyinka Malaysia
- Xoghayaha Guud ee NCHE, Dr. Axmed Ibraahim Nageeye

Kulankaas waxaa la isla gartay:

- In labada hay'adood la mataaneeyo (twinning) si loo wadaago khibradaha iyo habraacyada tayada jaamacadaha.
- In NCHE lagu casuumo booqasho rasmi ah dalka Malaysia si ay u bartaan nidaamyada casriga ah ee dalkaasi ku shaqeeyo.
- In la billaabo diyaarin ku saabsan Heshiis Iskaashi oo Qaran (MoU) oo labada dal ku mideynaya horumarinta tacliinta sare.

Heshiiskan waxa uu u gogol xaarayaa Soomaaliya in ay si dhab ah uga faa'iidsato khibradda Malaysia ee dhinaca tacliinta sare.

MAHEF2025

Gunaanad

Ka-qaybgalka Soomaaliya ee shirka MAHEF2025 waxa uu horseeday:

- Xiriir cusub oo istaraatiiji ah oo u dhexeeya Malaysia iyo Soomaaliya
- Rajada in si buuxda loo xalliyo caqabadaha ardayda Soomaaliyeed ee wax ku barata Malaysia
- Billoow rasmi ah oo iskaashi togan oo u dhexeeya NCHE iyo hay'adaha tacliinta sare ee Malaysia
- Fursado ballaaran oo ku saabsan tababarro, cilmi-baaris wadajir ah, iyo sare u qaadidda tayada jaamacadaha dalka

Shirkan waxa uu noqday mid lagu xoojiyay doorka Soomaaliya ee madasha tacliinta sare ee caalamka, isla markaana ka dhigay mid wajahaya mustaqbal iskaashi oo ballaaran.



MADASHA 5AAD EE IS-WEYDAARSIGA AQOONTA HAWEENKA SOOMAALIYEED EE WAXBARASHADA SARE, CILMI-BAARISTA IYO AKADEEMİYADDA.

Somali Women in Higher Education, Research, and Academia.

Shirka Shanaad ee Is-weydaarsiga Aqoonta Haweenka Soomaaliyeed ee Waxbarashada Sare, Cilmi-baarista iyo Akadeemiyadda, oo ka qabsoomay Nairobi 20-kii Nofeembar 2025, ayaa isu keenay in ka badan 50 ka-qaybgalayaal ah oo isugu jiray aqoonyahanno, cilmi-baarayaal, macallimiin, hay'ado dowladeed iyo kuwo bulsho, dhalinyaro iyo ururrada haweenka,

Waxaana si qoto dheer looga dooday caqabadaha iyo fursadaha haweenka ee waxbarashada, hoggaaminta, nabadda iyo amniga, ka-qaybgalka STEM, tayada waxbarashada sare iyo dhaqaalaha siyaasadeed ee cilmi-baarista Soomaaliya; shirka oo ay tan iyo 2019 qabanaysay Somali Gender Hub wuxuu ujeedkiisu ahaa in la xoojiyo codka haweenka Soomaaliyeed, la dhiirrigeliyo cilmi-baaristooda, la dhiso kartidooda aqooneed, lana abuurro iskaashi iyo talooyin ku salaysan caddayn;



Dr. Cabdinur Sheekh Maxamed ayaa carrabka ku adkeeyay baahida loo qabo tayaynta iyo mideynta nidaamka waxbarashada iyo mudnaanta waxbarashada gabdhaha.

Halka Dr. Nadiifa Sheekh Cumar ay iftiimisay sida haweenku weli uga faquuqan yihiin geeddi-socodka nabadda iyo amniga inkastoo ay door weyn ka qaataan dhismaha nabadda, isla markaana ay la kulmaan caqabado dhaqan iyo hay'adeed oo xaddidaya hoggaamintooda, iyadoo adkaysay in doorkooda la aqoonsado lana xoojiyo.



MAALINTA MACALLINKA

21 Nofeembar 2025

Waxaa Muqdisho lagu qabtay xaflad qaran oo lagu maamuusayay Macallinka Soomaaliyeed, taas oo ay ka soo qayb galeen madaxda ugu sarreysa dalka, bahda waxbarashada iyo marti sharaf kala duwan. Xafladda waxa ka soo qaybgalay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Dr. Xasan Sheekh Maxamuud, iyo Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare, Farah Sheikh Abdulkadir.

Sidoo kale, munaasabadda waxaa ka qayb galay xubno ka tirsan Guddiga Qaranka ee Tacliinta Sare ee Soomaaliya, kuwaas oo kala ah Dr. Abdishakur Sheikh Hassan Fiqi, Dr. Ayan Sheikh Abdullahi, iyo Dr. Mohamed Moalim Abdullahi.



21 NOFEEEMBAR

11

**Xuska maalinta Macallinka
Soomaaliyeed**



ACSOS 2025

Shirwaynaha Sannadlaha 12aad ee Cilmi-baarista Soomaaliyeed



Shirwaynaha sannadlaha 12aad ee cilmi baarista Soomaaliyeed (ACSOS2025) oo cinwaanka sannadka uu ahaa: Dib u qaabaynta Bulshada iyo kaalinta Baraha Bulshada, Waxbarashada iyo Siyaasadda, kaas oo qabsoomay: 09-10-11/December 2025, waxana daahfuray Wasiirka Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta Sare, Mudane Faarax Shiikh C/Qaadir.



COP30

Isku Xirka Cilmi-baarista, Xogta, iyo Maalgelinta si loo Xoojiyo Adkeysiga Cimillada



Laga billaabo Caddeyn ilaa Fecil: Hirgelinta Xalal Cimiladeed oo Loo Dhan Yahay oo Diyaar u ah Maalgelin

Warbixintan waxay soo koobaysaa dood cilmiyeed ka dhacday COP30 oo diiradda lagu saaray isku xirka cilmi-baarista, xogta cimillada, iyo maalgelinta si loo xoojiyo adkeysiga isbeddelka cimilada. Kulanku wuxuu muujiyay in weli ay jiraan farqi u dhexeeya aqoonta cilmiyeed, xogta la heli karo, iyo helitaanka maalgelin, taas oo caqabad ku ah hirgelinta NDC-yada, NAP-yada, iyo yoolalka la qabsiga cimilada, gaar ahaan waddamada nugul.

Gunaanad ahaan, shirka oo uu ka qaybgalay Dr Mohamed Ibrahim, dooddu waxay adkaysay muhiimadda hay'adaha tacliinta sare iyo cilmi-baarista ee kaalin buuxinaya isku xirka aqoonta iyo ficilka. Isku-darka xog la isku halayn karo, cilmi ku saleysan baahiyaha maxalliga ah, iyo habab maalgelin oo hufan ayaa lagu tilmaamay furaha lagu gaari karo la-qabsiga waara, xalal bulsho-ku-saleysan, iyo hirgelin wax ku ool ah oo heshiisyada caalamiga ah.



NAGALA SOO XIRIIR

● www.nche.gov.so

● info@nche.gov.so

● +252 61 0 864444